



Fariinta hoos ku qoran ee aan dhawaan idinla wadaagnay taasi oo ku saabsaneyd munaasbada barnaamijka ikhtiyaariga gaarka ah ee fasalada K-5 kuwaasi oo laga helayo bakhtiyaanasiibka sanadlaha ah ee sanad-dugsiyeedka 2021-22. Haddaba fariintani lama xiriirto barashada qaabka ikhtiyaaraadka ee sanad-dugsiyeedkan aan hadda ku jirno. Waxaan idinka raaligelineynaa wixii faham daro ah ee ay fariintani sababtay.

---

## **Wax Ka Baro Ikhtiyaarada Ardaygaaga K-5 ee Munaasabadda Onlaynka ah ee Maarso 8 laga bilaabo 6-8 g.d.**

Febraayo 25, 2021

Qoysaska PPS ee Sharafta Leh,

Kuwa awood u yeelan waayey inay xaadiraan [Sahami munaasabadda Ikhtiyaaradaada K-5 ee Febraayo 18](#), waxa aanu bixinaynaa munaasabadda mar labaad Isniinta, Maarso 8, laga bilaabo 6-8 g.d.

Munaasabaddan onlaynka ah waxa ay siin doontaa macluumaad qoysaska leh ardayda K-5 ah ee danaynaya ikhtiyaarrada diirad saaridda mawduuceed, dugsiyada beddelka ah iyo kuwa gaarka ah, iyo barnaamijyada isdhexgelinta labada luuqadood – waxana ku jiri doona kulan guud oo wax lagaga baranayo la xidhiidhka dugsiya xaafadahaaga iyo codsashada beddel, oo ay ku xigaan laba fursadood oo ah sahaminno qoto dheer oo ah qolalka xallinta caqabadaha ee dugsiya.

Qolalka xallinta caqabadaha barnaamijka isdhexgelinta labada luuqadood iyo kulanka guud waxa ay diyaar ku noqon doonaan luuqado badan, turjumaadduna waxa ay diyaar ku noqon doontaa Isbaanish, Fiitnaamiis, Soomaali, Raashiyaan, Kaantooniis iyo Maandariin.

Wax badan ka baro ikhtiyaarada K-5, oo ay ku jiraan tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan munaasabadda Maarso 8, barta [pps.net/k-5options](https://pps.net/k-5options). Linkiga kulanka onlaynka ah waxa la soo dhigi doonaa Maarso 1.

Fadlan sidoo kale ogow in wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiga ikhtiyaarrada dugsiyada hoose uu yahay Maarso 16. Waxa aad ka codsan kartaa barta [pps.net/schoolchoice](https://pps.net/schoolchoice).